Ministerie van Veiligheid en Justitie

# Waxaa lagaga shakisanyahay in aad fal dambiyeed gashay

Waxaa lagu qabtay maadama ey jirto fal dembiyeed lagaga shakiyey in aad gashay, sababtaas dareteed waxaa ku soo qabtay hey'ad dembi baaris, sida booliiska oo kale. Ama waxaa lagu soo casumay in lagu wareysto. Xuquuqdaada waa maxay maxaase dhacaayo marka lagu wareysto kadib?

Warqadaan waxaa ku qoran xaqaaga iyo waajibaadkaaga iyo sida geedi socodkaan yahay. Sidaas darteed warqadaan warbixinta sii fiican u aqriso.

## Su'aalo?

Kadib markaad aqrisid warqadaan su'aalo maa qabta? Waxaa su'aalahaas weydisaa qareenkaaga/lawyerkaaga, ama booliiska, ama hey'ad kale oo ku saabsan dembi baarista oo arrintaada la xiriira. Warqadaan marka laga hadlaayo booliis, waxaa laga yaaba in hey'ad kale oo dembi baarid sameyso in laga wado.

Warbixin dheeraad haddaad rabtid waxaa gasha www.juridischloket.nl ama waxaa wacda taleefanka 0900 - 8020 (€ 0,25 halki daqiiqo).

## Haddi aadan af Nederlandees kugu filan aqoonin

In kugu filan ma ku hadashid ama ma fahamtid af Nederlandees miyaa? Markaas waxaad xaq u leedahay qof ku turjumo wareysiga booliiska inta ku jirtid. Taas oo lacag la'aan ku ah. Waxaa xataa xaq u leedahay in lagu turjumo dukumiintiyadda kiiskaaga, tusaal ahaan amarka lagugu soo xiray ama waraaqada lagugu amraayo in aa maxkamadda hor timaadid.

## Waxaa ku istaajiyey booliiska isla markaasna ku soo waday xafiiska booliiska

Haddii booliiska ku istaajiyaan ayaga oo kaga shakiyey in aad fal dembiyeed sameysay, arrintaas waa laga wareysanaa. Taas oo micnaheedu tahay in booliiska su'aalo ku weydii karaan.

## Xuquuqda aad leedahay

- Waxaad xaq u leedahay in aad oggaatid fal dembiyeedka lagaga shakisanyahay in aad sameysay
- Qasab kugu ma ahan in aad su'aalaha lagu weydiiyey ka jawaabtid. Xaq ayaa u leedahay in aad aamusnaatid.
- Waxaa xaq u leedahay in aad gooni u la hadashid qareen/looyar intaadan galin wareysiga **ka hor**
- Waxaa xaq u leedahay in u qareen/looyar u ku la joogo **marka mareysid** wareysiga si oo kuu caawiyo. Taas oo warbixin dheeraad ah ka akhrisan kartid warqadaan.
- U sheeg booliiska haddi aadan wax fahmin. U sheeg xataa haddi aa jirantahay, aa rabtid in aa dhakhtar la hadashid ama si degdeg ah aad ugu baahantahay kaalin caafimaad ama daawo aad u baahantahay.
- Haddi oo sakaalka cadaaladda oo go'aamiyo in aa sii joogtid saldhigga booliiska, markaas waxaad xaq u leedahay in aa qof qoyskaaga ama saaxiib aa tihiin u sheegtid in aa meeshaas ku xiran tahay. Mararka qaarkood waxaa laga yaaba in u sarkaalka booliiska go'aamiyo in wili lagu oggoleen in aa qof la hadashid ama u sheegtid in aad xiran tahay. Asaga ku sheegaayo in lagu oggolyahay iyo in kale.

- Ma qabtid miyaa dhalashada Nederlandeeska? Markaas waxaad codsa karta in safaaradda ama qonsulka dalkaaga loo sheego in lagu soo xiray.
- Waxaa xaq u leedahay in aa dukumiintiyadda aragtid, haddi ey jiraan. Sarkaalka cadaaladda waxaa laga yaaba mararka qaarkood in u diido in aa dukumiintiyada aad aragtid. Asaga taas ku sheegaayo.

*Meeqo ayee booliiska xoriyadda ka qaadi karaan?*
- Dembiga lagaga shakinaayo ee ku xirantahay, laakin ugu badnaan waxaa lagugu xiri kara xarunta booliiska muddo dhan 90 saac saac (3 maalmood iyo 18 saac).
- Haddi loo baahdo in oo wakhti intaa ka dheer lagu haayo, waa inuu qaadi go'aankaas gaara. Waxaa weydiisa qareenkaaga dooda ku furan haddi aa ka soo horjeedid xiritaankaaga ama xiritaankaas in wakhti dheeraad ah lagu daro.

*Xaq aa u leedahay qareen*
Intaadan wareysiga galin waxaa xaq u leedahay in aa muddo dhan nus saac aa sii sir ah u la hadashid qareen. Wakhtigaas oo haddi loo baahdo lagu dari karo nus saac kale.

- Haddi oo fal dembiyeed aad u culus lagaga shakisanyahay oo caiqaab gaareysa 12 sano ama ka badan u qoran - tusaale ahaan arrimo la xiriira qof la dilay ama dil - ama booliiska aa ku arko qof xaaladiisa maskaxiyan daciif ey tahay, markaas qareen a lagu qabana inta lagu wareysan ka hor. Taas oo lacag la'aan ku ah. Haddi aa rabin in oo qareen kugu caawiyo kiiskaaga, waxaa taas u sheegi karta qareenka lagu qabtay.
- Haddi oo fal dembiyeed culus lagaga shakisanyahay - dembiyaal oo xata inta maxkamad lagu hor geynin lagu xiri karo (tusaal ahaan guri aa jabsatay) - markaas waad dooran kartaa haddi aa rabrid in qareen lagu qabto. Taas oo lacag la'aan ku ah.
- Haddi oo fal dembiyeed culeys aheyn lagaga shakisanyahay markaas waad dooran kartaa haddi aa rabrid in qareen lagu qabto. Laakin waa in aad adiga qareen qabsata oo adiga iska bixisaa kharashka qareenkaas.

Xataa marka ku jirtid wareysiga waxaa xaq u leedahay in oo qareen ku la galo wareysigaas si oo kugu caawiyo. Haddi fal dembiyeedka loo maleynaayo in aa gashay mid culus yahay, kharashka qareenkaas adiga laga ma rabo. Haddi fal dembiyeedka loo maleynaayo in aa gashay mid fudud yahay, kharashka qareenkaas adiga ayaa laga raba in aa iska bixisid.

Haddi aadan hubin xalaadaada midka ey tahay, waxaa weydiisa:

- In adiga xaaladaada darteed oo qareen lagugu qabanaayo ama in aad kala dooran kartid;
- In aad adiga laga rabo in aa iska bixisid kharashka wadahadalka qareenka.

Qareen ma taqaana aa rabtid in oo arrintaada kugu caawiyo, u sheeg booliiska ayaga ku qabaanaayo. Haddi oo qareenkaas ku qorneyn liiska hey'adda raad voor de rechtsbijstand, markaas waa in aa adiga iska bixisa kharashka qareenkaas.
*Haddi ee booliiska qareen ku qabanaayan waxay warbixin adiga shaqsiyan kugu saabsan ayaa waxaa laga diiwaangelinaaya hey'adda qaabilsan caawinaada xagga sharciga (Raad voor de Rechtsbijstand).*

- Haddi aa kowdi dhahday ma rabi qareen in oo ku caawiyo, waa lagu oggolyahay in aa gadaal iska badashid
- Haddi aa sheegtay in aa rabtid in oo qareen kugu caawiyo kiiskaaga, loo ma oggola booliiska in ee wareysiga bilaabaan inta aa qareenkaaga la hadlin. Laakin haddi ey jirto sabab degdeg ah, waa la oggolyahay in ey bilaabaan wareysiga, tusaal ahaan haddi ey jirto arrin ku xiran nolol iyo dhimasho
- Laakin oggow in ey wakhti qaadan karto inta oo qareenka ka imaanaayo saldhigga aa ku xirantahay. Waxaa khasab ah in oo qareenka marka booliiska ey la soo xiriiraan kadib labo saac gudaheed in oo ku imaado saldhigga booliiska ama goobta wareysiga.

## Booliiska ayaa kugu casumay in aad saldhigga booliiska timaadid si lagu wareysto

Haddi lagugu casumay in aad timaadid saldhigga booliiska si lagu wareysto maadama aad tahay qof shaki laga qabo in u fal dembiyeed galay waxaa wici karta inta oo wareysiga bilaaban qareen. Qareenkaas oo warbixin ku sii kara iyo talo sharci. Qareenka waxaa loo oggolyahay xataa in oo ku la joogo wareysiga inta oo socdo. Haddi qareen qabsatid, qarshka qareenkaas waa in aa adiga iska bixisid. Waxaa qasab ah in aad cadeysid qofka tahay. Sidaas darteed waxaa soo qaadata aqoonsi dhicin, tusaalo ahaan baasaboor ama waraaqadda oggolaashada darawalnimada.

*Qareen muxuu kugu caawi kara intaadan galin wareysiga ka hor?*
Qareenka wuxuu sameyn kara inta lagu wareysan kahor arrimaha hoos ku xusan:
- in u ku sharaxo fal dembiyeedka lagaga shakisanyahay in aad gashay
- talo sharciyan in uu ku siiyo
- in u ku sheego nidaamka wareysiga booliiska
- in u ku sheego xuquuqda iyo waajibaadka aad leedahay marka ku jirtid wareysiga
- in u la xiriiro qoyskaaga ama shirkadda u shaqeysid si oo ugu sheego xaalada ku jirtid (waa haddi aad rabtid)

Booliiska ma dhageysanaayo waxa aa adiga iyo qareenkaaga ku wada hadashiin. Wax walbo aad kala hadashid qareenkaaga waa sir. Adigo oggoleen qareenka qofna kala ma hadli karo waxa aad dhahday. Xataa booliiska ama sarkaalka cadaaladda u ma sheegi karo.

*Qareen muxuu kugu caawi kara wareysiga marki la galo?*
- qareenka wareysiga ka hor ama ka dib oo wax dhihi kara ama qofka ku wareysanaayo oo su'aalo weydii kara
- Adiga ama qareenkaaga ayaa hal mar codsan kartiin in wareysiga

la joojiyo si aa adiga iyo qareenkaaga u wada hadashiin

- Haddi aad su'aalo fahmin, haddi aad inta wareysiga socdo aad dareentid in culees aan caadi aheyn lagu saaray ama xaaladaada caafimaadka daraadeeda aadan awoodin in aa wareysiga sii wadid markaas qareenka aa arrimahaas kala hadli karo qofka wareysiga ka qaadaayo
- Wareysiga ka dib qareenka wuxuu eegi kara qoraalka laga qoray wareysiga iyo wuxuu sheegi kara haddi qoraalkaas oo waxyaalo khalad ah ey ku jiraan.

## Maxaa dhacaayo marka lagu wareysto ka dib?

*Kiiskaaga oo si kala duwan loo soo af jari karo:*

**In la joojiyo**

Kiiskaaga sii shuruud ku xiran aa loo joojin kara. Markaas ma lagu daba galaayo. Joojinta laakin waxaa lagu xiri kara shuruud kala duwan oo laga rabo in aad jabinin. Tusaal ahaan waxaa shuruud lagaga dhigi kara in laga mamnuucay in aad dhibanaha la xiriirtid ama in ey hey'ad dadka dembi soo galeen ilaalisa arrintaada la socota. Shuruudaha miyaa jabisay? Ama mar kale maa fal dembiyeed gashay? Markaas wili waa lagu daba gali kara fal dembiyeedki aa kowdi gashay. Waxaa markaas lagu hor keenaaya maxkamad oo arrintaada go'aan ka gaareysa.

**Go'aan ciqaab**

Haddi oo sarkaalka cadaaladda oo aaminsanyahay in aad fal dembiyeedka gashay, wuxuu sameyn kara in u ku saaro go'aan ciqaabadeed. Ciqaabadaas oo tusaale ahaan noqon karta ciqaab lacag ama ciqaab shaqo. Ciqaabtaas oo noqon kara xataa in lagu diido in aa baabuur wadid (diido babuur wadow) ama shuruud laga rabo in aa ku dhaqaaqdid, tusaal ahaan in aa qof la xiriirin ama in ey qasab kugu tahay in aa hey'ad ilaalinta dadka horre dembi u soo galay aa la xiriirtid.

Ma rabta in aa Isla markiba kiiskaaga lasoo afjaro? Markaas ciqaabta lacagta ah saldhigga booliiska aa markiba ku bixi karta. Taas oo kaliya macquul ah haddi aad arrintaas kala hadashay qareen. Isla markiba ma iska bixineysa lacagtaas? Markaas kiiska markiba wuu xirmay. Taas oo micnaheedu tahay in aad ciqaabtaas racfaan ka qaadan kartid ama ka soo horjeesan karin.
Haddi oo sarkaalka cadaaladda go'aansado in u ku diido baabuur wado ama ciqaab shaqo ah, markaas kowdi waa lagaa wareysana arrintaas. Wareysigaas waxaa kala tashan karta qareenkaaga. Wareysigaas waxaad kaga la qeyb gali karta adiga oo qareen kula socdo.

Ma rabta in u qareenkaaga kula joogo marka wareysigaas galeysid? Markaas wareysiga waxaa laga dhigi kara wakhti kale haddi loo baahdo. Wareysigaas oo xataa loo isticmaali karo xiriir oo video ah.

**Wadaheshiis**

Sarkaalka cadaaladda wuxuu xataa go'aansa kara in u ku soo jeedoyo wadaheshiis. Taas oo micnaheedu taha in sharuudo khaas ah lagugu xiraayo. Haddi aad shuruudahaas jabinin, waxaa ka hor tageysa in lagu daba galo fal dembiyeedkaas. Shuruuda ugu muhiimsan oo ah: lacag in aad bixisid, in aa dhebanaha siisid lacag makhdow ah ama in aad ka tanasushid alaab laga xaraashay. Haddi aad ka soo bixi weysid heshiiskaasn ama wakhiga lagu qabtay gudahiisa uga soo bixi weysid. Markaas waa in aad soo hor istaagtid maxkamad oo arrintaada go'aan kartid gaareyso. Heshiiskaas oo xataa isla markiba iska bixi kartid. Tusaal ahaan haddi aadan qabin meel aa toos u deggan tahay ama uga qoran tahay dalka Nederland.

**Qaali maxkamad**

Kiiskaaga waxaa xataa la horgey kara maxkamadda. Waxaa lagu soo diraa warqad amar oo maxkamadda lagagu soo hor keenaayo. Waxaa ku qoran amarkaas fal dembiyeedka lagugu eedeynaayo iyo taariikhda, goobta iyo wakhtiga oo arrintaada maxkamadda ka shaqeyneyso.

## Ma qabta ama ma qabtid dembi aa horre u gashay?

Ma oggolaatay ciqaab? ama waxaa oggolaatay heshiis sharuud oo sarkaalka cadaaladda ku soo jeediyey? Markaas waxaa lagu qoraa arrintaas oo systamka cadaaladda laga diiwan gelinaayo. Taas oo micnaheedo ah in ey suurto gal tahay in lagu diido waraaqadda asluub wanaagsan oo loo yaqaan VOG aa u baahan kartid shaqooyinka ama shaqo barad qaarkooda hadda rabtid in lagu siiyo. Qareen aa arrimahaan warbixin dheeraad ah ka sii karo sameynta ey leedahay go'aankaan. Waxaa booliiska xataa weydiisa in ey ku siiyaan waraaq gooni ah oo lagugu sharaxaayo sameynta ee leedahay go'aamadaan. Waxaa warbixin dheeraad xataa ka akhrisan karta: www.justis.nl/producten/vog

Waraaqadan waxaa soo saaray:
Wasaaradda Amniga iyo Cadaaladda
Postbus 20301 | 2500 EH Den Haag

Maarso 2017 | 101106

*Waxa ku qoran waraaqadaan xuquuq aa ku doodi kartid ma ahan*